**Somali, 2008**

# Waaxda APA ee Cilminafsiga Adduunka: iyadoo kooban **

Grant J. Rich, PhD, *University of Alaska Southeast*

Markii ay muddo badan qorsheynayeen ayey February 21, 1997 hoggaamiyayaasha Ururka Cilminafsiga ee Mareekanka oggolaadeen qeybtan cusub ee 52 "Ciminafsiga dunida".
Ujeedadoodu waa in ay "horumariyaan oo ay hagaajiyaan xiriirka dhaqaatiirta cilminafsiga ee wada deggan si ay u wadaagaan aqoonta, oo ay dhiirrigeliyaan kormeerka, ama ay isku dhiirigeliyaan dhaqanka ka dhaxeeya ee cilmi baarista ah, oo ayna hormariyaaanna hawlaha kiliinikada, iyo inay hormariyaan danaha guud ee laga leeyahay APA."

Inta lagu guda jiray 10 kii sanadood ee ugu horreysay ayaa la ansixiyey qeybta sida aan caadi ahayn u firfircoon ee ka tirsan 52 kana mid ah APA, marka laga eego siyaaba badan. (1) waxay daabacdaa jariidad heer sare ah oo iminkana waxay hoos timaadaa tifatiraha **Senel Poyrazli**, *International Psychology bulletin* waxayna leedahay maqaallo asal ah ee ku saabsan Ciminafsiga dunida oo idil,waxaana qoray dhakhtarka cilminafsiga ugu sarreeyo iyo kuwa kale (2) waxay sameysay bog internet ee hoosyimaado bogagga internatyada **Richard Velayo** iyo **Shay Mann,** www.internationalpsychology.net, kaas oo inasiinaya macluumaad waqtiga la socda cubna ee loogu talagalay katirsanayaasha. (3) APA borogaraamkiisa ugu horreeyey wuxuu ahaa1998 wuxuu ku saabsanaa 120 qoraal ee ka kala socday 39 waddan. (4) waxaana la oggolyahay magacaaabista lagu gudoonsiiyo abaalmarinada ugu wanaagsan: dhakhaatiirta cilminafsiga, horjooge, arddada cilmibaarista, cilmibaarista lagu sameeyo jinsiga/haweenka, iyo buugaagta ugu wan-wanaagsan. (5) wuxuu siinayaa katirsanayaasha tixgellin oy si firfircoon kaga qeybgeli karaan qorshooyin muhiim ah, iyo shabakadda ay ku mideysanyihiin 70 uur ee caalemiga oo wada shaqeyn ka dhaxeyso, iyo liistada e-mailka ee bil kasta layskula xiriiro (listserv) ee uu qorey **Richard Velayo, waana** buugga cub ee caalimi ah ee taxane ahee la jiro jariidadda Cilminafsiga (Psychology Press ) ee hoosyimaado tifatiraasha **Uwe Gielen** and **Harold Takooshian**, afhayeenka shabakadda, iyo weliba buugaag qiima jaban ah ama waxyaabaha kaloo ay katirsanayaasha leeyihiin.

Bilowgii ugu horeysay 52 waxay ku faraxday in ay hesho taageerada firfircoon ee hoggaamiyayaasha APA oo uu ku jiro sargaalka ugu sareeya maamulka sare (Chief Executive officer) Raymond D. Fowler. Afarta madaxweynre ee 12 ka ugu horeyey 52 waxay ahaayeen madaxweynayaasha APA dhamaantood (halkaan ayey ka muuqdaan) Ernst Beier, Florence Denmark,* Gloria Gottsegen, Frank Farley,* Charles Spielberger,* Harold Takooshian, Richard Velayo, Norman Abeles,* Joy K. Rice, Michael J. Stevens, Uwe P. Gielen, Lynn H. Collins. Qeybtan waxay si dhow ula shaqeysaa APA Guddiga Xiriirka Caalemiga ee Cilminafsiga (CIRP) waxaana la sameeyey 1944, waxayna u oggolaaneysaa dhakhaatiirta Cilminafsiga Mareekanka iyo ardada ama dunida oo dhan si ay ugu xirmaan Qeybta Caalemiga si ay qeyb fir-fircoon uga qaadan lahaayeen iyagoo bixinaya qiimaha xaddidan ee sanadkiiba mar la bixiyo.
Sanadkii 2008 qiimaha ardaygiiba wuxuu ahaa $15, dadka xirfadda leh waa $30. Wixii dheeraad ah waxaad ka eegan kartaa bogga 52, www.internationalpsychology.net.

52 maanta waxauu ka taaganyahay mid ka mid ah lixda urur ee caalimiga ee laga midnoqdo, mid kastana wuxuu leeyahay ujeeddadiisa u gaarka ah (Stevens & Wedding, 2006):

2. IAAP (waxaa la sameeyey 1920) waana Ururka Cilminafsiga qeybahiisa kala duwan. Wuxuu tira ahaan 000 katirsanayaal dunida gaarayaan 2, wuxuuna soo siiyaa jariidadda afartii biloodba mar soo baxdo (*Applied Psychology: An International Review*) iyo shirweyne la qabto afartii sanaba mar. .(www.iaapsy.org).

3. ICP (1941) waa gudiga talo bixinta dhaqaatiirta Cilminafsiga ee Caalemiga. Wuxuuna iminka tira ahaan katirsanayaashiisu gaarayaan 800 ee dunida oo dhan., wuxuuna soo saaraa jariidad afartii biloodba mar soo baxda (*International Psychologist*), iyo shirweyne sanadkiiba mar la qabto. (www.icppsych.tripod.com).

4. IACCP (1972) waa urur caalami ee dhaqan-is-weydaarsiga oo dhaqaatiirta Cilminafsiga waxaana shirweyne la qabtaa labadii sano mar. (www.iaccp.org).

5. IUPsyS (1951) ururka Caalamiga ee midowga sayniska Cilminafsiga. Waxaa ku mideysan 64 dal (malaha qof kelidii kama tirsana), wuxuuna soo saaraa jariidada *International Journal of Psychology,* wuxuuna martigeliyaa shirweyne ay dhaqaatiirta cilminafsigaiskuga afartii sanaba mar. (www.iupsys.org).

6. IPSO (1999) waa ururkqa arda Cilminafsiga ee caalamiga waxaana ka soo banaanbaxay koox cusub ee arday dawlado badan oo aduunka ka kooban. (www.psychologystudents.org

Reference: Stevens, M.J., & Wedding, D. (2006). (Eds.). *Psychology: IUPsyS Global Resource CD, 2006.* Hove, UK: Psychology Press. (www.psycpress.co.uk).

*** Based on an original overview of APA Division 52 prepared in 2008 by its outreach officers: John D. Hogan, Rivka Bertisch Meir, Mercedes A. McCormick, Harold Takooshian.*